

## **Waa in qoysku ay dhalinyarada kala hadlaan arrinka ku saabsan xafladda xiritaanka iskuullada**

Iskuullada waxaa la xiri doonaa 30.5.2020, laakiin xanuunka safmarka ah ee feyruska korona awgiis sannadkaan xafladihii xiritaanka iskuulka lama qabanaayo. Waxaase la faliyaa in si kasta oo xayiraad iyo talooyinka la isia siiyay ay u jiraanba, haddana in dhalinyaradu ay isu iman doonaan si ay ugu xafladeeyaan bilowga fasaxa xagaaga. Waxaana iska caadi ah in isticmaalka mukhaadaraadka ee dhalinyarada dhexdooda xafladaha noocaas oo kale ah uu yahay arrin caam ah, sababtaas awgeedna ay soo baxaan khatarta ah in ay dhacaan shilal kala duwan. Si kastaba qaar badan oo carruurta iyo dhalinyarada ka mid ah waxaa ay xafladda xiritaanka iskuulka u dhiganayaan gu'ga sannadkaan si nidaamsan oo aan wax dhibaato ah laheyn.

Booliska, ambulaasyada, shaqalaha arrimaha dhalinyarada iyo shaqaalaha iskaa wax u qabsada ku shaqeeyaba, waxaa xafladihii la dhigay sannadihii hore ay ka qabteen shaqo farabadan. Sannadkaan xitaa xaaladdaas oo kale waa ay u diyaar garoobeen, waxaana goobaha aadka loo jecel yahay ee la isugu yimaado jooga, booliska bariga Uusimaa, shaqaalaha arrimaha dhalinyarada ee magaalada Vantaa, gaariga heeganka ee laanqeyrta cas iyo shaqaale iskaa wax wax u qabso ku shaqaynaaya. Boolisku waxaa ay waalidka iyo dhalinyaradaba siin doonaan warbixinta arrimaahs ku saabsan.

### **Markii si aan sax aheyn loo xafladeeyo, waxaa badaneysa khatarta ah in shilal ay dhacaan**

Goobaha la isugu yimaado ee maagalada Vantaa ee ay dhalinyaradu aadka u jecel yihiin waxaa ka mid ah bannaanka hore ee iskuullada iyo xannaanooyinka, iyo agagaarka jardiinooyinka ama beeraha nasashada ee guud. Meelaha aadka loo jecel yahay ee bariga Vantaa waxaa ka mid ah agagaarka goobta loo aado majobaxsiga ama socodka ee Kuusijärvi, Dixi iyo beerta nasashada ee Heureka, iyo beerta nasashada Jokiuoma ee galbeedka Vantaa. Qaar ka mid ah dhalinyarada Vantaa, waxaa sida ay sameeyaan kumannaan kale oo dhalinyarada ah ay u jiheystaan dhanka farasmagaalaha ama bartamaha Helsinki iyo beerta nasashada ee Ranta puisto ee Järevnpää si ay halkaas ugu soo xafladeeyaan.

Sannadihii hore ee la soo dhaafay qaar badan oo dhalinyarada ka mid ah si aad u daran ayay u cabsanayeen. Sidoo kale sannadihii la soo dhaafay shilalkii iyo khasarihii dhacay ka sokow waxaa intaa sii dheeraa in ay dhaceen dambiyo, sida jirdil, faraxumayn xagga jinsiga ah iyo dhacba. Cabsanaanta ama sakhraamistuba marka loo eego falalka kale waa ay kaga khatar badan tahay in uu qofku noqdo dhibane loo geystay fal dambiyeed ama shil uu soo gaaro.

### **Telefoonka marka lagu soo waco qabo ama ka jawaab**

Booliska, hawlwadeennada badbaadada carruurta iyo shaqaalaha dhalinyaraduba waxaa ay la soo xiriiri doonaan waalidiinta dhashay carruurta aan qaangaarin, haddii la helo ilmaha oo cabsan khamri ama isagoo sameeyay fal dambiyeed. Sannadkii hore waalidiinta si wanaagsan ayay telefoonka uga jawaabayeen, loona helaayaay markii loo baahdo, iyaga ayaana soo doonayay dhalinyarada si ay uga soo kaxeeyaan goobta uu arrinku ka dhacay oo ay guriga u geeyaan. Waxaan waalidiinta ka codsaneynaa in ay telefoonada ka jawaabaan galabtaas xafaladda ay dhaceyso, oo haddii laga soo waco lambarka qarsoon ay qabtaan.

Sidoo kale shaqaalaha dhalinyarada ee magaalada Vantaa waxaa ay bixinayaan adeeg dhanka telefoonka ah. Bariga Vantaa waxaa shaqada dhalinyarada ka mas'uul ah Juho Outavaara tel. 0400 414356, Galbeedka Vantaa Juha Huopainen tel. 040 631 8685. Haddii uu jiro welwel kaa haya arrimaha ilmahaaga ama kuwa kaleba waxaad soo wici kartaan telefoonnadaas aan idiin soo sheegnay.

Waxaa haboon in waalidku ay dhalinyarada kala hadlaan arrimaha ku saabsan khatarta la xiriirta xafladda xiritaanka iskuulka. Waxaad ka heshiisaan arrinka ku saabsan, in xafladaynta wanaagsan aanay sababin in boolisku soo waco waalidka ama ay dhacaan shilal dhaawac ah oo aan wanaagsanayn.